SHIRKA FIIDIYOWGA EE KULANKA GUDIGA

I. Shirarka fiidiyowga – Goobaha u Furan Dadweynaha

Xubnaha Gudiga Waxbarashada waxay shiraraka gudiga kaga qaybgeli karaan muuqaal fiidiyow ah, hadii goobta ay joogaan ay u furan tahay dadweynaha, iyo dadweynaha la siiyay ogeysiis ku haboon sida lagu qeexay sharciga iyo siyaasada. Xubnahan ayaa laga yaabaa inay kaga qaybqaataan dhamaan dhinacyada shirka, oo ay ku jiraan golaha maamulka, munaaqashada, iyo codaynta. Xubnaha gudiga ee ka qaybqaadanaayo kulanka fiidiyowga waa in ay soo sheegaan tirada guud ee dadka ka soo qaybgalay goobtaas.

Degmada waxay samayn doontaa dadaal kasto oo macquul ah si ay u hubiso in xarunta goobta kulanka aasaasiga ah ay u ahaato caqabad la'aan dadka naafada u ah jir ahaan, qaabisho dhamaan xubnaha dadweynaha ee rabo inay ka soo qaybgalaan. Goobaha uu xubinka kaga qaybgaalo kulanka fiidyowga ee u furan dadweynaha malooga baahno inay u hogaansamaan shuruudahan.

II. Shirarka Fiidiyowga ah ee ku jiro Duruufo aan caadi ahayn (Sharciga Saraakiisha Dadweynaha Qaybta 103-a) - Goobaha aan Dadweynaha u Furnayn

Iyadoo la raacaayo qaraarka ogolaanaayo siyaasadaan, xubnaha gudiga waxaa loo ogol yahay inay kaga qaybgalaan shirarka fiidiyow ahaan marka ay jirto duruufo aan caadi ahayn, si waafaqsan sharciga gobolka iyo siyaasadaan. Duruufaha aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah: naafanimo, jiro, mas'uuliyado daryeel, ama arin kale oo muhiim ah ama lama filaan ah ama dhacdo kasto oo u diidayso ka qaybgalka xubinka shirka jir ahaan.

Si loo isticmaalo shirka fiidiyow ahaan marka ay jirto duruufo aan caadi ahayn, golaha xubnaha Gudiga waa in ay joogaan isla goobta ay dadweynaha kaga soo qaybgeli karaan kulanka. Xubnaha gudiga ee shirka fiidiyowga marka ay jirto duruufo aan caadi ahayn waxay ka qaybqaadan karaan munaaqashada kulanka iyo codaynta, iyo goobta ay joogan loogama baahno inay dadweynaha u furaan, laakiin maku xisaabtamaayaan golaha ilaa goobta ay joogaan ay u furaan tahay dadweynaha.

Shuruuda golaha shaqsi ahaan laguma dabaqi doono hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo masiibo ah oo dawladeed ama xaalad degdeg ah oo maxalli ah, hadii degmada ay go'aansato in xaalada degdega ah ay saamaynayso ama wax u dhimayso awooda Degmada u leedahay inay qabato shir shaqsi ahaaneed.

Si aad uga qaybgasho kulanka fiidiyowga ee marka ay jirto duruufo aan caadi ahayn, xubnaha Gudiga waa inay ogeysiiyaan karaaniga Degmada, ama wakiilka, isla markii loo baahdo, iyagoo sheegaayo duruufaha aan caadiga ahayn. Tani waa inay dhacdaa ugu yaraan afar iyo labaatan (24) saacadood ka hor kulanka si ogeysiis haboon loo siiyo dadweynaha ilaa duruufo aan caadi ahayn ay ka hor istaagaan xubinta Gudiga inuu sidaas sameeyo. Ogeysiinta noocaan oo kale waxaa lagu sameyn karaa (tusaale ahaan, telefoon, elektaroonig, qoraal ama shaqsi ahaan), laakiin xubinta Gudiga waa in ay helaan xaqiijin, si ay u ogaadaan in codsiga la helay iyo la ansixiyay. Karaaniga Degmada, ama qofka wakiilka, ayaa samayn doono ogaysiisyada ku haboon si loo xaqiijiyo golaha kulanka shaqsi ahaaneed.

Hadii in ka badan hal xubin oo ka mid ah Gudiga ay rabaan inay ka qaybgalaan isla kulanka iyagoo adeegsanaayo kulanka fiidiyowga ah duruufo aan caadi ahayn darteed, Degmada waxay tixgelin doontaa baahida kulanka loo qabo goobaha meesha ay dadweynuha kaga soo qaybgeli karaan. Degmada waxay dib u dhigi kartaa shirarka hadii ay haboon tahay.

Siyaasadaan, ama habraacyada qoran ee Degmada u dejisay kulanka fiidiyowga ee duruufaha aan caadiga ahayn, dukumeenti gaar ah, waxaa lagu soo dhejin doonaa website ka Degmada.

Marka laga reebo fadhiyada fulinta ee sida saxda ah loo qabto, dhamaan xubnaha Gudiga (tusaale ahaan, kuwa kaga qaybgalaayo shaqsi ahaan iyo shirka fiidiyowga labadaba) waa inay awoodaan in la maqlo, la arko iyo la aqoonsado (tusaale, magacooda koowaad iyo kan dambe in la muujiyo) inta lagu jiro shirka, oo ay ku jiraan dhamaan qaybaha, soo jeedinta, go'aaminta ama arin kasto oo kale oo si rasmi ah looga hadlaayo ama loo codeenaayo.

Dhamaan kulamada la baahiyo ama la isticmaalo tiknoolajiyada kulanka fiidiyowga waxaa la isticmaali doonaa teknoolojiyad u ogolaanayso in ay helaan xubnaha dadweynaha naafada ah, oo waafaqsan Xeerka Maraykanka ee Naafada qabo, sida wax laga bedelay.

Dhamaan shirarka ku lug leh kulanka fiidiyowga ee duruufaha aan caadiga ahayn darteed, Degmada waxay siin doontaa xubnaha dadweynaha fursad ay ku daawadaan kulanka muuqaal ahaan, oo ay faalooyin dadweynaha uga qaybqaataan kulanka fiidiyowga waqtiga dhabta ah marka la ogolaado faalada dadwaynaha, sida la mid ah faalada shaqsi ahaaneed.

Daqiiqado inta lagu jiro, ka qaybgalyaasha kulanka fiidyowga duruufo aan caadi ahayn darteed waxaa la sheegi doonaa xubnaha kaga qaybgalay qadka.

Dhamaan shirarka kulanka fiidyowga lagu qabto duruufo aan caadi ahayn darteed waa la duubi doonaa, marka laga reebo qaybaha lagu qabtay fadhiga maamulka sare. Duubista waxaa lagu soo dhejin doonaa ama lagu xiriirin doonaa website ka Degmada shan maalmood oo shaqo ah gudahooda laga bilaabo maalinta kulanka, iyo waxoo ku dhagsanaan doonaa ama ku xiriir sanaan doonaa ugu yaraan shan sano kulanka ka dib. Duubista waxaa la qori doonaa marka la codsado.

Tixraac aan toos aheyn: Sharciga Gudiga (2300)

Tixraac: Sharciga Saraakiisha Dadweynaha §§102; 103; 103-a; 104
Waaxda Gobolka NYS, Gudiga Dowlada Furan, Fikrada Latalinta OML-AO-#5575 (3/6/2018)
"Su'aalo iyo Jawaabo, Cutubka 56 ee Sharciyada 2022," Gudiga NYS ee Dowlada Furan, https://opengovernment.ny.gov/system/files/documents/2022/05/chapter-56-of-the-laws-of-2022-guidance-document-05-20-22.pdf

Qoraalka: La qaatay Luulyo 28, 2011 iyadoo la raacayo Qaraarka 2011-12: 103; Wax laga bedelay Janaayo 26, 2017 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2016-17: 500; Wax laga bedelay Oktoobar 28, 2021 iyadoo la raacayo Qaraarka 2021-22: 243; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 555 (Siyaasadii hore ee 2325 Kulanka fiidiyowga)

ct/sg